



Farriintan waxaa si dhaqso ah loo soo gelin doonaa onlaynka iyadoo ku qoran [العربية اللغة](#), [English](#), [Русский](#), [Soomaali](#), [Español](#), [简体中文](#) iyo [Tiếng Việt](#).

Febraayo 10, 2025

Ku socoto: Xubnaha bulshada I/DD, iskaashatada Qabaa'ilka iyo shaqaalaha Xafiiska Adeegyada Naafooyinka Korriinka (ODDS)

Ka socoto: Dana Hittle, Agaasime Ku-meelgaar ah, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (ODDS)

Mawduuca: Hakinta laalida sharciyeed ee bixiyaha

Ma nabad baa,

Farriintan waxaa loogu talagalay bulshada naafooyinka garashada iyo koboca (I/DD). Warkaan wuxuu muhiim u yahay:

- Wakaaladaha bixiyaha ee mustaqbalka
- Wakaaladaha bixiyaha ee sugaya in codsiyadooda dib loo eego
- Wakaaladaha bixiyaha ee hadda jira
- Hay'adaha maareynta kiiska

Janaayo 10, ODDS wuxuu ka dalbaday Xarumaha Federaalka ee Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) hakin lix bilood ah oo la doonayo in lagu sameeyo Wakaaladaha Nooca Caadiga ah ee cusub iyo

bixiyeyaasha guriga ee 24-ka saac. Weli wadahadal ayaa inoo socda innaga iyo CMS.

Laga bilaabo Febraayo 10, 2025:

- **Dhaqangal ma ahan wax laalid sharciyeed ah.**
- **ODDS ayaa weli qabanaysa dhammaan codsiyada cusub ee bixiyaha.**

Marka aynu go'aan isku raacno innaga iyo CMS, wargelin kale ayaan kuu soo diri doonaa. Hoggaanka ODDS iyo ani ayaa wixii xog ah ee soo kordha had iyo jeer ku wargalin doona nala hawlgaleyaasheena inta shirarka lagu jiro.

Macluumaad dheeraad ah

Ogeysiiska 10-ka Janaayo:

[English](#), [Español](#), [اللغة العربية](#), [简体中文](#), [Русский](#), [Soomaali](#), [Tiếng Việt](#)

Haddii aad su'aalo qabtid, fadlan iimayl u dir

dd.licensing@odhsoha.oregon.gov.

Daacadnimo,



Dana Hittle

Agaasimaha Kumeelgaarka ah

[Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka \(Office of Developmental Disabilities Services, ODDS\)](#)

[Isku diiwaangeli kolba wixii soo kordha xafiiska ODDS.](#)

Ka akhri farriimaha Agaasimaha ODDS barta

[https://www.oregon.gov/odhs/agency/Pages/odds.aspx#dm.](https://www.oregon.gov/odhs/agency/Pages/odds.aspx#dm)

Nagala soco Facebook-ga @oregonDHS.IDD.

Waxaad ku heli kartaa bilaash dukumintigaan isagoo ku qoran luuqado kale, far waawayn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay u qoran. Kala xiriir Oregon ODDS lambarka 503-945-5811 ama dd.directorsoffice@odhs.oregon.gov. Waxaanu aqbalnaa wicitaanada dhammaan noocyada adeegga gudbinta ee loogu talagalay dadka Dhegaha La', Maqalka Ku Adag Yahay, Dhegaha iyo Indhaha La', dadka aragga la' ama araggoodu hooseeyo. Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyeyaasha adeegga gudbinta booqo <https://www.oregonrelay.com> ama [https://www.fcc.gov/general/internet-based-trs-providers.](https://www.fcc.gov/general/internet-based-trs-providers)